JAMHUURIYADDA SOMALILAND | REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 26/03/2022 |
|---|---|---|


# XEERKA NIDAAMKA GARSOORKA
# XEER LR.24/2003


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com



Sannadka 2022

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF JSL/DECM/249-763/042008 DATE 08/04/08

# DECREETO MADAXWEYNE NO:337/042008

DHAQAN-GALKA XEER LR 24/2003
XEERKA NIDAAMKA GASOORKA

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee Xeer Lr.24/2003.

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL.

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/KF-6/419/2008 ee 19/03/08 kuna ansixiyeen qodobka 10aad ee Xeer Lr.24/2003 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka oo soo jeedintii Madaxwaynaha JSL Golaha Wakiiladu ku ogolaadeen kuna waafajiyeen Dastuurka JSL qodobkiisa 105aad.

Markuu arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Wuxuu Soo Saaray**

*Dhaqan-galka Qodobka 10aad ee* ***Xeer Lr. 24/2003*** *ee Nidaamka Garsoorka*

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Our ref: GW/KF-21/308/2003

Date: 22.12.2003

## Go'aan Ansixin Xeerka Nidaamka Garsoorka (Xeer No.24/2003).

## Golaha Wakiilada JSL

**Markuu Arkay:** Qodobada 37(2)aad, 79 (2)aad, 96(5)aad, 97aad, 98aad 99aad, 100aad, 101aad, 102aad, 103aad, 104aad, 105aad, 106aad, 107aad, 108aad, iyo 113 (1)aad ee Dastuurka Jsl.

**Markuu Darsay:** Mabaadiida iyo Nuxurka Mashruuc-Sharciga Nidaamka Garsoorka ee Xukuumadu u soo gudbisay xambaarsan Yahay.

**Markuu Dhagaystay:** Warbixinaha iyo soo jeedimaha ay soo qadimeen Hay'adaha Maxkamadda Sare, Xeer-ilaaliyaha Guud Iyo Wasiirka Cadaaladda.

**Markuu Tixgaliyay:** Talooyinka Guddiyada Golaha ee ka soo shaqeeyay Mashruuc-Sharciga iyo mabda'a Dastuuriga ah ee kala Qoqobnaanta awoodaha Waaxyaha Qaranka Jsl.

**Markuu u Codeeayay:** Ansixinta Mashruuc-Sharciga Nidaamka Garsoorka fadhigii 22/12/03 oo ay goob-joog ahaayeen 49 Mudane oo ka mid ah Xubnaha Golaha.

**Wuxuu**

**Cod aqlabiyad ah oo (33 Cod) oo gacan taag ah ku ansixiyay Xeerka Nidaamka Garsoorka JSL oo ka kooban 49 qodob. Halka ay ka diideen 11 Mudane, 4 Mudane oo kalena ka aamusan, Guddoomiyuhu aanu codayn sida u caadad ah.**

**Allaa Mahad Leh.**

(Maxamed Xuseen Cismaan)
Xoghayaha Guud ee G/Wakiilada

Axmed Maxamed Adan
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada

# Jamhuuriyadda Somaliland

## GOLAHA WAKIILADA

## XEERKA NIDAAMKA GARSOORKA (Xeer Lr.24/2003)

| | |
|---|---|
| Markuu Arkey: | Qodobada 26aad, 28aad, 37(2) aad, 79(2) aad,96(5) aad, 97aad, 98aad, 99aad, 100aad, 101aad, 102aad, 103aad, 104aad, 105aad, 106aad, 107aad, 108aad, 113(1) aad iyo 114(1/2) aad ee Dastuurka JSL. |
| Markuu dhagaystay: | talooyinka ay soo jeediyeen Wasiirka Cadaaladda, Gudoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee la xidhidhiidha xeerkan |
| Markuu Tixgeliyey: | mabaadiida kala qoqobnaanta awoodaha (seperation of powers) waaxyaha Qaranka ee Dastuurku Jideeyay. |

Wuxuu Ansixiyey Xeerkan:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qaybta 1aad

## Mabaadiida Guud

### Qod. 1aad

### Macnaha erey-bixinta

Erayada (weedhaha) hoos ku qoran, haddii aan si kale loo macneyn waxaa Xeerkan gudihiisa loo fasirayaa siyaabaha soo socda:

**Garsoore:** Waxa loola jeedaa sharci-yaqaanka si Xeerkan waafaqsan loogu magacaabey Hawsha garsooranimo.

**Xubnaha Garsooridda:** Waxa loola jeedaa Maxkamadaha darajooyinka kala duwan ee Sharcigani tilmaamay

**La Taliye:** Waxa loola jeedaa Garsoore kasta oo si waafaqsan xeerkan u gaadhey derejada Garsoore Maxakamadda Sare iyo Maxkamadda Racfaanka.

**Qareen:** Waxa loola jeedaa Qareenka wata Shahaadada sharciga ee ka soo qalin-jebiyay Jaamacado la aqoonsan yahay ama leh aqoon u dhiganta oo ku kasbadey khibrad, ruqsad qareenimona ka haysta Wasaaradda Cadaaladda.

**Darajada kowaad:** Waxa loola jeedaa Maxkamaddaha Gobolada iyo Degmooyinka.

**Dastuur:** Waxa loola jeedaa Jamhuuriyadda Somaliland.

**Guddida Caddaaladda:** Waxaa loola jeedaa hay'adda hogaamisa maamulka Waaxda Garsoorka ee Xeerkani tilmaamayo.

**Qaraar:** Waxa loola jeedaa go'aan kasta oo aan dhamaystirin dulucda dacwada.

**Go'aan:** Waxa loola jeeda go'aan kasta oo laga gaadho dulucda dacwada.

**Derajooyinka hoose:** Waxaa loola jeedaa Maxkamadaha Racfaaanka, Gobolada iyo Degmooyinka.

**Shaqaalaha Garsoorka:** Waxa loola jeedaa xubnaha kaaliyayaasha, Gaadhsiiyayaasha iyo shaqaale kasta oo looga baahdo hawlaha Maxkamadaha iyo xeer ilaalinta ee aan ahayn Garsoore ama ku xige Xeer Ilaaliye Guud.

### Qod. 2aad.

### Hawlaha Garsoorka.

1. Hawlaha Garsoorka waxa fulinaya Maxkamadaha, iyo xeer ilaalinta. Iyadoo mid kastaa ku ekaanayo awoodaha sharcigu u xadeeyey.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Iyadoo la eegayo sida ay u wada soconayaan, qoddobada Dastuurka iyo Xeerarka kale waxaa hay'addaha garsoorka ku waajib ah in ay dhaqan geliyaan shareecada Islaamka iyo xeerarka kale ee aan ka hor imaneyn, una adeegaya danta guud ee caddaaladda.

### Qod.3aad

### Ujeedooyinka Hawlaha Garsoorka.

1. Waaxda Qaranka ee Garsoorku iyadoo u madax banaan hawsheeda garsooridda, waxay dabaqaysaa Dastuurka, Shareecadda Islaamka. Iyo sharciyadda kale ee ka soo baxa waaxda Xeer-dejinta. Iyadoo ka madax-bannaan waaxyaha kale ee Qaranka, sida uu dhigayo Qoddobka 97aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka.
2. Waxay ka garsooraysaa go'aanna ka gaadhaysaa khilaafyada ka dhex dhasha laba qof ama in ka badan, xubin/xubno dadweynaha ah iyo dawladda iyo khilaafyada hay'adaha dawladda dhexdeeda, sida ku cad Qoddobka 97aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

### Qod. 4aad

### Xaqa Dacwadda iyo Is-difaaca.

Sida uu tilmaamayo Qoddobka 28aad ee Dastuurku:

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ka furan karo Maxkamadda Awoodda u leh dacwaddiisa si waafaqsan Xeerka.
2. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco Maxkamdda horteeda eed loo soo jeediyey.
3. Qaranku wuxuu kafaala qaadeyaa in qofka aan awood u lahayn inuu qabsado qareen dacwad ciqaab ah oo culus oo uu xeerku khasbayo in qareen difaaco, in uu u qabto qareen. Iyadoo qofka saboolka ahna laga dhaafi karo ajuurada kaga waajibtey dacwadda madaniga ah ee Maxkamadda awoodda u leh hortaalla.
4. Saboolnimadda ajuuradda laga dhaafayo ama qareen loo qabanayo waxa qiimaynaya qaraar kama danbays ahna ka soo saaraya guddoomiyaha maxkamadda dacwaddu hor taallo.
5. Iyadoo laga hortagayo in looga faa'iidaysto cashuur lunsi qodobkan faqradiisa 3'aad iyo 4'aad lagana fogaanayo in danyartu dacwad furan kari waydo waxaa Gudoomiyaha qiimaynaya saboolnimadda ku waajib ah inuu qaraarkiisa ku cadeeyo asbaabaha iyo caddeymaha uu qaraarkiisa u cuskaday.

## Qaybta IIaad.

## Qaybaha garsoorka

### Qod.5aad.

1. Garsoorku wuxuu u qaybsamayaa Maxkamadaha & Xeer-ilaalinta oo ka kaalmaysa dacwadaha ciqaabta iyo madaniga iyo dacwadaha kale ee xeerku u jideeyey ka qaybgalkooda.
2. Maxkamadaha dalku waxay ka kooban yihiin: -
   1. Maxkamadda Dastuuriga ah.
   2. Maxkamada Sare
   3. Maxkamadda Sare ee caddaaladda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

4. Maxkamadaha Racfaanka goboladda
5. Maxkamadaha Goboladda
6. Maxkamadaha Degmooyinka
7. Maxkamadda Ciidamadda qaranka

3. Maxkamadaha Ciidamada Qaranka iyo xeer- ilaalintoodaba xeer gaar ah ayaa lagu qeexi doonaa.

## Qodobka 6'aad

## Maxkamadda Dastuuriga ah

### Awoodaha iyo dhismaha maxkamadda Dastuuriga ah

1. Maxkamadda dastuuriga ah waxay ka kooban tahay Guddoomiyaha Maxkamadda sare iyo dhammaan garsoorayaasha maxkamadda sare, waxaana guddominaya guddoomiyaha maxkamadda sare.
2. Xarunta Maxkamadda dastuuriga ahi waa xarunta maxkamadda sare
3. Maxkamadda dastuuriga ah waxay dacwadaha iyo cabashooyinka soo gaadha ku gashaa fadhi buuxa.
4. Maxkamadda Dastuurigga ahi waxay awood u leedahay:

a. inay go'aan ka gaadho dacwadaha la xidhiidha go'aamadda maamulka iyo xeer dejinta ee aan waafaqsanayn Dastuurka ee ay soo hor dhigtyo cidda danaynaysa
b. Inay macnayso, fasirtana Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka lagaga dhaqmayo, marka laysku qabto ujeedadooda.

5. Maxkamadda dastuurigga ahi waxay dhagaysiga dacwadaha u raacaysaa nidaamka dacwad qaadista ee ku xusan xeerka habka madiniga iyo ciqaabta inta la socon karta xilkeeda.
6. Maxkamadda Dastuuriga ah waa inay ku caddeyso go'aanadeeda asbaabaha iyo caddaymaha ay cuskatey.
7. Maxkamadda dastuuriga waxay go'aamadeeda soo saaraysaa: -
   a. Kadib markay dhagaysato daristanna caddeymaha ay u soo gudbiyeen dhinacyadda ishayaa ama cidda danaynaysa.
   b. Waxa u bannaan inay si madax bannaan u raadsato caddeymo la xidhiidha cabashadda hortaal.
8. Guddoomiyaha iyo xubnaha maxkamadda dastuuriga ah midna lama duri karo, haddaanay dhinac ka ahayn cabashadda markaa hortaal.
9. Maxkamadda dastuuriga ah waxa kaaliye u ah kaaliyaha maxkamadda sare.

## Qodobka 7aad

## Maxkamadda Sare ee Cadaaladda

1. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay ka kooban tahay Gudoomiyaha Maxkamadda Sare, afar garsoore oo ka tirsan maxkamadda sare iyo afar xubnood oo laga soo xulay labada Gole (Guurtida iyo Wakiilada).
2. Xubnaha laga soo xulayo Golayaasha waxa soo jeedinaya Shirgudoonada waxana cod hal dheeri ah ku ogolaanaya labada Gole mid walba gaarkiisa.
3. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay dhagaysataa go'aana ka gaadhaa dacwadaha ciqaabta ah ee lagu soo ooggo xubnaha saddexda Gole.
4. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay dacwadaha ku gashaa fadhi buuxa.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

5. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay dhegaysiga dacwadaha u maraysaa xeerka habka ciqaabta intii uga suuragal ah.
6. Go'aanada Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waa inay ku caddaato asbaabaha iyo caddaymaha ay u cuskatay go'aanadeeda.
7. Xubinta la eedeeyay waxay xaq u leedahay inay qabsato qareenkiisa difaaca.
8. Eedaynta xubnaha saddexda Gole waxa maxkamadda ka hor oogaya Xeer Ilaaliyaha Guud ee qaranka ka dib marka xubinta laga xayuubiyo dhawrsanaanta.

Qod.8aad.

Maxkamadda Sare.

1. Maxkamadda Sare waa xubinta ugu sareysa Garsoorka J amhuuriyadda Somaliland.
2. Xarunta Maxkamadda Sare waxay ku taalaa Magaalo Madaxda dalka ee Hargeysa.
3. Maxkamadda Sare marka ay lagamamaarmaan noqoto, waxay fadhigeeda ku qabsan Kartaa meel kasta oo ka mid ah gudaha dalka Somaliland. Iyadoo awood u leh (jurisdiction) go'aan ka gaadhka dacwadaha ka dhaca dalka ee racfaanka loogu soo qaato.
4. Maxkamadda Sare waxay ka kooban tahay:
   a) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
   b) Tiro Garsoorayaal ah oo aan ka yareyn afar Garsoore.

Qod. 9aad

Awoodaha Maxkamadda Sare

1. Maxkamadda Sare waxay hubisaa in Qoddobada sharciga sidooda loo dabaqey ama loo fuliyey ama loo fasirey iyo in ay qabato Hawl kasta oo uu u xil saarey Dastuurku ama sharciyada kale ee ka soo baxa waaxda Xeer-dejinta.
2. Maxkamadda Sare waxay dacwadaha u dhageysan kartaa laba qaybood:
   a) Qaybta dacwadaha caadiga ah waxaa dhegeysan kara (saddex) Garsoore oo uu Guddoomiyahooda magacaabo guddoomiyaha Maxkamadda sare. Dacwadahaasi waa kuwa Racfaanka laga soo qaatey ee ka yimaadda Maxkamadaha Racfaanka ee Gobolada.
   b) Qaybta dacwadaha tashiga ah waxaa dhegeysanaya dhamaan Garsoorayaasha iyo Gudoomiyaha Maxkamadda Sare (Full bench).
3. Dhegeysiga dacwadaha loo dhan yahay, waxaa go'aan ka gaadhisteeda leh dhammaan Garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, marka ay u muuqato ahmiyadda arrinta go'aanka laga gaadhayo ay leedahay.
4. Maxkamadda Sare waxay awood u leedahay:
   a. Go'aan ka gaadhidda cabashooyinka laga keeno doorashooyinka guud (General Election) ee ku saabsan ansixinta doorashada Madaxweynaha iyo ku-xigeenka Madaxweynaha iyo ansixinta doorashada Xubnaha Baarlamaanka.
   b. Go'aan ka gaadhidda khilaafyadda dhex mara qaybaha garsoorka ee
   c. ku saabsan xagga awoodda dhagaysigga dacwaddaha.
   d. Go'aam ka gaadhidda dacwadaha laga keeno go'aamada dhamaadka ah ee maamulka dawladda.
   e. Dhagaysigga cabashooyinka laga keeno maxkamaddaha goboladda ee ku saabsan kuraasidda Golayaasha deegaanadda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

f. Maxkamadda sare waxay awood u leedahay inay dib u eegto xukumadeeda marka la helo shuruudaha ku xusan qodobka 266 ee Xeerka habka madanigga ah.

g. Maxkamadda Sare waxay go'aamadeeda ku saabsan cabashada & dacwooyinka laga keeno doorashada Madaxweynaha & Madaxweyne ku Xigeenka, doorashada Baarlamanka iyo Golayaasha Degaanka u raacaysaa hab la mid ah kan ku xusan qodobka 6aad, farqadihiisa 5,6, iyo 7aad ee xeerkan.

### Qodobka 10aad

### Magacaabista iyo Xil ka qaadista Gudoomiyaha & Garsorayaasha Maxkamada Sare

1. Guddoomiyaha Maxkamadda sare magacaabistiisa waxa soo jeedinaya Madaxweynaha Jsl, waxaana cod hal dheeri ah ku diidaya ama ku oggolaanaya Golaha Wakiiladda iyo Golaha Guurtidda oo fadhi wada jir ah leh. Hadday golayaashu diidaan dib looma soo celin karo, isla markaasna xil ka qaadistiisa waxa soo jeedinaya madaxweynaha JSL waxaana oggolaanaya ama diidaya labada Gole (Guurtidda & Wakiiladda).
2. Garsoorayaasha maxkamadda sare waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL, markuu la tashaddo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare isla markaana xilka iyo maamuuskaba Waxaa ka qaadaya Madaxweynaha JSL, iyagoo la wadaaga garsoorayaasha kale qodobka dhawrsanaanta garsoorayaasha.

### Qod.11aad.

### Maxkamadda Racfaanka.

1. Xarunta Maxkamadda Racfaanku waxay ku taalaa magaalo madaxda Gobolka ay awoodeeda Maxkamadeed gaadhsiisan tahay.
2. Maxkamadda Racfaaku waxay hawlaheeda Maxkamadeed ku qabsan kartaa meelkasta oo xuduudda Gobolka ah, haddii uu sidaa ku go'aamiyo Guddoomiyuhu.
3. Maxkamadda Racfaanku waxay go'aan ka gaadheysaa, dacwadaha racfaanada looga soo qaato xukumada maxkamadda derejada Kowaad ee Gobol, iyo degmo.
4. Maxkamadda Racfaanku waxay leedahay laamaha soo socda:
   a) Laanta caadiga ah (General Appellate Section)
   b) Laanta tashiga (Assize Appellate Section)
   c) Laanta carruurta (Juvenilles Section)
   d) Laanta cashuuraha. Iyo maaliyadda
5. Laanta caadiga ah ee Qoddobka, farqadiisa 4(a) aad ku xusani, waxay go'aan ka gaadhaysaa racfaanada laga qaato dacwadaha madaniga iyo ciqaabta ah ee Maxkamaddda Gobolka iyo Degmada oo keli ah.
6. Laanta tashiga ee qodobkan, farqaddiisa 4 (b) aad ku xusani waxay go'aano ka gaadhaysaa racfaanada laga soo qaato xukunnada Maxkamadda Gobolka laanteeda tashiga, waxaana dhegeysanaya:
   a- Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka
   b- Laba Garsoore oo ka tirsan maxkamadda racfaanka.
   c- Laba xubnood oo lagu soo xulay aqoon ay u leeyihiin Shareecadda Islaamka.
7. Maxkamadda Racfaanku waxay awood gaara u leedahay, aqoonsiga xukumada iyo qoraalada rasmiga ah ee ka dhaca dal kale.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

8. Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku waa sarkaalka Gobolka ugu sareeya xagga hawlaha garsooridda, wuxuu ku leeyahay inta xudduudda Gobolkiisa kormeer Idaari ah oo ku saabsan socodka hawlaha maxkamadaha Gobolka, degmooyinka iyo Xabsiyada, islamarkaana wuxuu u igman yahay hawlaha maamulka ee Wasaaradda caddaaladda ee Gobolka.
9. Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku wuxuu awood u leeyahay:
   - a- In uu dacwad u kala wareejin karo laba Degmo oo isla Gobalkaas ah, nabad-gelyo darteed.
   - b- In haddii durrisi ku timaado Guddoomiyaha maxkamadaha derejada kowaad ee Gobolkaas, uu ka soo saaro qaraar waafaqsan duristaas.

## Qod.12aad.

## Maxkamadda Gobolka.

1. Maxkamadda Gobolku waxay ku taalaa magaalo madaxda Gobol kasta, awoodeeda maxkamadeedna waxay gaadhsiisan tahay xuduudda Gobolka.
2. Maxkamadda Gobolku waxay fadhigeeda ku qabsan kartaa meel kasta oo ka mid ah xuduudda Gobolka.
3. Maxkamadda gobolku waxay awood u leedahay, dhegeysiga dacwadaha ka baxsan awoodda Maxkamadda Degmada, ee ka dhaca Gobolka sharcigu tilmaamayo.
4. Maxkamadda Gobolku waxay awood u leedahay, go'aan ka gaadhista cabashooyinka laga keeno doorashada Golayaasha Deegaanka iyo ansixinta xubnaha Goleyaasha Deegaamada.
5. Maxkamadda gobolku waxay awood u leedahay go'aan ka gaadhidda dacwadaha madaniga ah ee ay dawladdu dhinac ka tahay.
6. Guddoomiyaha maxkamadda Gobolku wuxuu si gooni ah awood ugu leeyahay go'aan ka gaadhidda dacwadaha ciqaabta ee lagu soo oogo caruurta yar yar (Juveniles).
7. Maxkamadda Gobolku waxay awood u leedahay dacwadaha xuquuqda shaqaalaha.
8. Maxkamadda Gobolku waxay yeelaneysaa laamahan soo socda:
   - a. Laanta dacwadaha madaniga ah
   - b. Laanta dacwadaha ciqaabta
   - c. Laanta dacwadaha cashuuraha iyo maaliyadda.
   - d. Laanta dacwadaha ciqaabta ee caruurta (Juvenilles)
9. Dacwadaha Ciqaabtu waxay u qaybsan yihiin laba laamood:
   - e. Laanta Caadiga ah
   - f. Laanta tashiga ah
10. Laanta caadiga ahi waxay awood u leedahay, dhegeysiga dacwadaha Ciqaabta ah ee uu xadhigeedu ka badan yahay (3) sano, kana hooseeyo (10) sano
11. Waxa dacwadaha caadiga ah dhegaysan kara hal Garsoore keliya.
12. Dacwadaha tashiga ah waxa dhegeysan kara:
   - a) Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka iyo hal garsoore oo ka tirsan Maxkamada Gobolka
   - b) Hal xubin oo lagu soo xulay aqoon uu u Illeeyahay shareecadda islaamka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Qod. 13aad.

### Maxkamadda Degmada.

1. Maxkamadda Degmadu waxay ku taalaa Degmo kasta oo xuduudda dalka JSL ah, awoodeeduna waxay gaadhsiisan tahay xuduudda degmadaa.
2. Maxkamadda degmadu waxay fadhigeeda ku qabsan kartaa, meel kasta oo ka mid ah xudduuda degmadda.
3. Maxkamadda Degmadu waxay awood u leedahay dacwadaha shareecada Islaamka (Xeerka Qoyska), dacwadaha madaniga ah ee qiimahoodu gaadhsiisan yahay ilaa (3,000,000) SI.Sh. Iyo dacwadaha ciqaabtoodu gaadheyso ilaa (3) sano ama iyo ganaax Lacageed oo ah ilaa (3,000,000) SI.Sh

## QATBTA IIIaad.

## Ka Cabashada Xukunnadda & Qaraarrada.

### Qod. 14aad.

### Racfaanada iyo Cabashooyinka.

1. Racfaanada dacwadaha Madaniga ah ama Ciqaabta ah waa in ka cabashadoodu ku dhisnaato, arrimaha khuseeya xaqiiqda dhabta ah ee dhacdooyin ka dacwadaha iyo fasiraadda runta ah ee qoddobada sharciga ee dacwaddaa loo cuskadey.
2. Maxkamadda Racfaanka loo soo qaatey waxa u banaan inay ayido, ama baabiiso ama wax ka bedesho xukunkii ama qaraarkii hore.
3. Racfaanada Maxkamadda Sare loo soo qaato waxay ku dhisnaanayaan:
   a) Awood la'aanta maxkamaddii hore
   b) Ku xad gudubka ama si xun u dabaqaadda qoddobada sharciga ee xukunka loo cuskadey.
   c) Habka dacwadda loo qaadey oo aan sharciga waafaqsaneyn.
4. Sababayn la'aanta xukunka iyo iyadoo aanay caddaymaha loo cuskadey ku filayn goynta gartaa.
5. Cabashooyinka laga keeno go'aanada kama danbeysta ah ee ansixinta doorashooyinka Baarlamaanka iyo Mdaxweynaha iyo ku-xigaanka Madaxweynaha, Maxkamadda Sare waxay waafajineysaa Dastuurka iyo Sharciga Doorashooyinka, go'aankeeduna waa kama danbeys, ku noqoshana malaha.
6. Cabashooyinka laga keeno go'aanada kama danbeysta ah ee maamulka dawladda, waxa awoodda go'aan ka gaadhisteeda leh Maxkamadda Sare waana kama danbayn.

### Qod. 15aad.

### Muddada Racfaanada.

1. Muddada racfaan qaadashadu waxa weeye (30) Soddon cisho kana bilaabmaysa, Maalinta lagu dhawaaqay go'aanka dacwadda ciqaabta, ama dhinacyada dacwadda Madaniga ah iyo kuwa la bahda ahba la gaadhsiiyo oo laga soo saxeexo Nuqul xukunka ah, si waafaqasan sida uu tilmaamayo Xeerka habka medeniga ah.
2. Qoraalka Racfaan qaadashadu waa inuu saxeexnaadaa, ku cad yahayna asbaabta racfaanku, haddii aanay asbaabta racfaanka keliftey ku caddeyn qoraalka, lagama qaban karo.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Waxa qoraalka racfaanka lagu hagaajinayaa xafiiska kaaliyaha Maxkamadda go'aankeeda racfaanka laga qaadanayo. Kaaliyaha qoraalka racfaanka ah loo dhiibey waa in uu u gudbiyaa, iyadoo gal-dacwadeedkii la socdo, Maxkamadda racfaanka loo qaatey.
4. Marka uu Xafiiska Xeer-ilaalinta guud Racfaan ka qaato Dacwadda ciqaabta, waxaa waajib ah in eedeysanaha lagu gaadhsiiyo Nuqulka Racfaanka ilaa (30) maalmood, laga bilaabo maalinta Racfaanka uu xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud keeney.
5. Haddii ay muddada Racfaanku dhaafto, hasayeeshe ay maxkamadda Sare ku qanacdo, asbaabta uu keeney dhinaca muddo dhaafku ku dhacay, wey kordhin kartaa muddada racfaan qaadashada.

### Qod. 16aad

### U Furnaanshaha Doodaha Dadweynaha Iyo Sababaynta Xukunada.

1. Doodaha Garsoorku asal ahaan waa kuwa dhageysigoodu ay albaabadu u furan yihiin dadweynaha, xaaladaha uu sharcigu tilmaamayo mooyaane oo ay ka mid yihiin, kuwa anshaxa guud ama caafimaadka.
2. Go'aanada Maxkamaduhu waa in ay ahaadaan kuwo sababaysan, qaraarada garsoorayaashuna waa in ay ahaadaan kuwo qoran, waa in mar kastaba la qeexaa asbaabta loo cuskadey, fasiraadda qoddobada lagu xadgudbay iyo kuwa loo cuskadey iyo wax walba oo faaiido u leh sugidda caddaaladda.
3. Si gooniya waxaa haboon in ku dhawaaqidda xukunka qofka ciqaabta la saarey u muujinayo sidii uu ugu soo noqon lahaa mujtamaca.

### Qod.17aad.
### Qareenimada.

1. Dhinac kasta waxaa u banan in uu u adeegsado Qareen ku xeel-dheer sharciga dacwad kasta oo ku lid ah oo hortaal Maxkamadaha Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Dacwadaha ciqaabta ee lagu xukumi karo dil, xabsi daa'im xadhig ka badan Toban Sano (10) waa waajib in eedaysanuhu u adeegsado difaaciisa Qareen sharciga yaqaan
3. Dacwadaha Maxkamadda Sare Racfaanka loogu soo qaato dhegeysigooda waxa ka doodi kara oo keli ah Qareen sharci yaqaan ah.
4. dhibanaha waxa u bannaan inuu qabsaddo qareen ka kaalmeeya arrimaha sharciga

## QAYBTA IVaad.

## Hay'adda Garsoorka

### Qod.18aad.

### Xubnaha Garsoorka.

1. Hawl-wadeenada Hay'adda Garsoorku waxay ka kooban yihiin:
   a) Garsoorayaasha
   b) Ku Xigeenada Xeer-Ilaaliyaha Guud
   c) Kaaliyayaasha (Registerers)
   d) Gaarsiiyayaasha (Messengerers)



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Derejooyinka iyo xuquuqda xubnaha hay'adda Garsoorka waxa lagu dhaqayaa sharciga shaqaalaha dawladda.
3. Derajooyinka xubnaha Garsoorku waa sidan:
    a) Derajada (A) oo ah Garsoorayaasha, ku Xigeenada Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Kaaliyaha Sare ee Maxkamadda Sare.
    b) Derajada (B) Kaaliye
    c) Derejada (C) Gaadhsiiye
    d) Derajada (D) Nadiifiye.

**Qod. 19aad.**

**Dhaarta Xubnaha Garsoorka.**

Waxa xubnaha hawl-wadeenada hay'adda Garsoorka ku waajib ah in ay dhaartaan inta aaney shaqada Qaranka bilaabin, sida soo socota:

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud waxay Madaxweynaha JSL, hortiisa ku marayaan dhaarta Dastuuriga ah ee xusan qoddobka 129aad ee Dastuurka.
2. Garsoorayaasha Maxkamadaha iyo ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud, waxay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa ku dhaaranayaan (Waxaan Ilaahay ugu Dhaaranayaa in aan u noqonayo daacad Dastuurka iyo Xeerka kale ee JSL, xilkana u gudanayo si daacadnimo ah).
3. Kaaliyayaasha iyo gaadhsiiyayaasha Maxkamaduhu, waxay ku hor dhaaranayaan Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Racfaanada, dhaarta ku xusan farqadda 2aad ee qoddobkan.

**Qod 20aad.**

**Derajada iyo Meelaynta Garsoorayaasha.**

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka A1
2. Garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyayaasha maxkamadda rafcaanka A2
3. Garsoorayaasha Maxkamadda Rafcaanka & Guddoomiyayaasha maxkamadda Goboladda iyo ku Xigeenada Xeer-Ilaaliyaha Guud A3
4. Garsoorayaasha Maxkamadda Goboladda & Gudoomiyayaasha maxkamadaha degmooyinka A4
5. Garsoorayaasha Maxkamadaha Degmooyinka A5
6. Kaaliyaha Maxkamadda Sare A6

9 marka ay baahiyi timaaddo Guddiga Caddaaladdu Garsoorayaasha waxay muddo aan ka badnayn (3) bilood loo bedeli karaa maxkamaddii looga baahdo, derajo kasta ha ahaatee isaga oo wata derajadiisa, xataa haddii ay ka hoosayso Derajadiisa.

**Qod. 21aad**

**Magacaabista garsoorayaasha/Ku Xigeenada Xeer. Guud**

Qof kasta oo rabitaan u leh shaqada Garsoorenimo ama ku Xigeen Xeer-ilaaliye Guud, waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

1. Waa in uu u dhashay Somaliland, da'diisuna ka yareyn 23 jir.

2. Waa in uu haysto shahaado Jaamacadeed oo sharci (LLB) oo la aqoonsan yahay ama aqoon u dhiganta.
3. Waa in uu codsi u soo qortaa Guddoomiyaha Guddiga Caddaaladda.
4. Waa in uu ku sifoobaa akhlaaq wanaagsan bulshada dhexdeeda.
5. Waa in Guddiga Cadaaladdu uu kulan la yeeshaa (Interview), imtixaanna ka qaadaa.
6. Hadii Guddiga Caddaaladdu ku qanco in uu ku Xigeen Xeer-Ilaaliye guud/Garsoore Mudan yahay, wuu ansixinayaa magacaabistiisa.
7. Marka la ansixiyo in uu Garsoore/Ku xigeen Xeeer-ilaaliye guud noqdo wuxuu gelayaa (1) hal Sano oo tijaabo/tababar shaqo ah, inta aanu dacwado dhegeysi bilaabin. Muddadaas waa laga yareyn karaa ama laga badin karaa hadba inta baahidu le'eg tahay.

**Qod.22aad.**

**Magacaabid Gaar ah.**

Qofkii loo aqoonsado inuu sharciga ku xeel-dheer yahay, sida Bare Sare (professor) Jaamacadeed oo sharciga ah, Qareen sharci-yaqaan ahaa ilaa Toban Sano (10) ama ka badan, waxa Madaxweynaha JSL u magacaabi karaa Garsoore Maxkamadda Sare.

**Qod. 23aad.**

**Dalacaadda Garsoorayaasha.**

1. Garsooreyaasha lagu sheegey qoddobka 21aad, mid kastaa wuxuu ka bilaabayaa shaqada Garsooridda Garsoore Maxkamad Degmo, wuxuuna uga sii dallaci karaa Goddoomiye Maxkamad Degmo, marka uu ugu yaraan ahaado Laba (2) Sano Garsoore Maxkamad Degmo, Iyadoo loo eegayo mar kasta asluubtiisa iyo shaqo wanaagiisa.
2. Guddoomiyaha Maxkamadda Degmadu, wuxuu u dalaci karaa Garsoore Maxkamad Gobol, marka uu ugu yaraan ahaado (2) Sano Guddoomiye Maxkamad Degmo, iyada oo mar kasta loo eegayo asluubtiisa iyo shaqo wanaagiisa.
3. Garsooraha maxkamadda Gobolku wuxuu u dalici karaa Gudoomiye Maxkamad Gobol iyadoo loo eegayo anshaxiisa iyo shaqo wanaagiisa.
4. Guddoomiye Maxkamada Gobol wuxuu u dalici karaa, La taliye Maxkamad Racfaan, marka uu ugu yaraan (2) Sano yahay Guddoomiye Maxkamad Gobol.
5. La taliye Maxkamada Racfaan wuxuu u dallaci karaa Guddoomiye Maxkamad Racfaan, marka uu ugu yaraan ahaa La-Taliye Maxkamada Racfaan muddo aan ka yareyn (3) Sano.
6. Guddoomiye Maxkamad racfaan wuxuu noqon karaa La-taliye Maxkamad Sare markuu ugu yaraan ahaa (4) Sano Guddoomiyaha Maxkamadda racfaanka.
7. Habka dallacaaddu wuxuu mar kasta ku imanayaa bannaanidda derajada ka sareysa, haddii aaney sababo sharci ahi ka reebeynin.

**Qod. 24aad.**

**Shaqo ka Fadhiisashada Garsooraha/Xeer Ilaaliyaha.**

Muddada uu Garsooruhu shaqada ku gaadhi karaa waa ilaa 65 jir, haddii aanay imanin sababo uu kaga fadhiisan karo oo ah kuwan soo socda:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

1. In uu Garsooruhu/Xeer ilaaliyuhu iskii shaqada isaga casilo (Resingnation)
2. In uu Garsooruhu/Xeer ilaaliyuhu gaadhay da'dii shaqada lagaga fadhiisan lahaa (Retirment) hasa yeeshee Garsooraha baahi darteed muddada shaqada waa loo cusboonaysiin karaa hal Sano, kamana badnaan karto 5 Sano.
3. In garsooraha/Xeer ilaaliyaha shaqada lagaga fadhiisin karo sabab caafimaad darted, ka dib marka guddiga caafimaadka Qaranku uu caddeeyo sidaa.
4. Inuu ku kaco wax garsoorka fadeexad ku ah guddiga cadaaladduna go'aan ka gaadho shaqo ka fadhiisintiisa.

## Qodobka 25aad

## Garsoorayaal Shisheeye

1. Si ku meel gaadh ah baahi loo qabo darteed waa la qoran karaa garsoorayaal shisheeye oo ku xeel dheer xagga sharciga iyo hawlaha garsooranimada.
2. mudada ay shaqada ku jiraan waxay yeelanayaan xuquuqda iyo xishmada ay leeyihiin garsoorayaasha u dhashay dalka.

## Qod.26aad.

## Dhawrista Sharafta Garsooraha/Xeer Ilaaliyaha.

1. Arrimaha la xidhiidha shaqo siinta, hoos u dhigidda, xil ka wareejinta, beddelaadda iyo anshax marinta Garsoorayaasha/ku Xigeenada Xeer-Ilaaliyaha Guud waxay ku qeexan tahay qoddobka 108aad, farqadiisa (1) ee Dastuurka.
2. Sida ku qeexan qoddobka 108aad, farqadiisa (2) ee Dastuurka, "Garsoore/ku Xigeen Xeer ilaaliye Guud lama xidhi karo maxkamadna lama hor geyn karo, haddaanay ogolaan Guddiga caddaaladu ama haddii aan lagu qaban isagoo dembi cad faraha kula jira (Flagrante Delicto) oo ugu yaraan 3 Sano lagu xidhi karo."
3. Mar haddii maamuuska iyo sharafta Garsooraha/Xeer ilaaliyaha sida kor ku tilmaaman loo dhawrayo waxaa ka reebban Garsooraha in uu xubin ka noqdo Urur/Xisbi Siyaasi ah ama ku kaco dhaqan xumo sharafta Garsooridda wax u dhimaysa.

## Qod. 27aad

## Magacaabidda ku-meel-gaadhka ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare wuxuu magacaabi karaa si ku-meel gaadh ah Garsoore ama Guddoomiye Maxkamadeed, sidoo kale Xeer Ilaaliyaha Guud wuu magacaabi karaa si ku meel-gaadh ah ku Xigeen Xeer-ilaaliye Guud, marka ay jiraan sababo baahiyeed, wuxuuna hor dhigayaa Guddiga Caddalada fadhigiisa u horeeya.

## Qod. 28aad.

## Fasaxyada, Meelaha Bannaanaada.

1. Fasaxa caadiga ah ee garsoorayaasha waxaa bixinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, uu ogeysiinayana Madaxweynaha JSL, wuxuuna u igman karaa oo bixinaya Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Racfaanada, inta ku siman Goboladooda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

2. Fasaxa aan caadiga ahayn waxaa bixin kara ilaa (15) maalmood oo keli ah, Guddoomiyayaaasha maxkamada Racfaanada inta ku siman Goboladooda ka dib marka ay ku qancaan sababta fasaxa waxayna ogaysinayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
3. Marka Gddoomiyaha Maxkamadda Sare maqan yahay ama uu gudan karin xilkiisa caafimaad darro awgeed, waxa ku sime ahaanaya Garsooraha xagga derajada ugu sareeya (Seniority) Garsoorayaasha Maxkamadda Sare.
4. Fasaxa caadiga ah ee ku xigeenada Xeer ilaaliyaha Guud waxa bixin kara Xeer-ilaaliyaha Guud, isagoo ogaysiin siinaya Guddiga Cadaaladda.
5. Marka Xeer-ilaaliyaha Guud maqan yahay ama buko ama aanu xilka gudan karin sabab kasta ha lahaatee, waxa xilkiisa sii haynaya ku Xigeenkiisa dhinaca derajada u sareeya.
6. Fasaxa aan caadigga ahayn ee ka badan 15 maalmood waxa loo soo gudbinayaa Guddiga cadaaladda oo go'aan ka gaadhaya

## Qod.29aad.

## Qorista Shaqaalaha Maxkamadaha Iyo Xeer Ilaalinta

1. Marka ay timaaddo baahi ah in shaqaale loo qoro Maxkamadaha ama Xeer-ilaalinta, waxaa la raacayaa habka qorista shaqaalaha dawladda ee uu tilmaamayo sharciga shaqaalaha dawladdu.
2. Wasiirka Wasaaradda Cadaaladdu marka uu helo codsiga Xeer-ilaaliyaha Guud ama Guddoomiyaha ay khusayso ee maxkamad racfaan wuxuu qoraal uu ku qeexayo baahidaa u qorayaa Guddiga Shaqaalaha Dawladda oo si waafaqsan sharciga kor ku tilmaaman ugu soo xulaya.

## Qod. 30aad.

## Sannadka Hay'adda Garsoorka

1. Fasax sanadeedka hay'adaha garsoorku waa bisha Rammadaan oo shaqada la joojinayo 1da ilaa 30ka Ramadaan bishaa, fasax sannadeedka awgeed.
2. Garsoorayaasha, ku Xigeenada Xeer ilaaliyaha Guud iyo shaqaalaha hawsha sii wada bisha ramadaan fasaxooda waxa dib loo siinayaa mar kale.

## Qod. 31aad

## Guddiga Cadaaladda.

1. Sida uu qeexayo qod. 107aad ee Dastuurku waa hay'dda ugu sareysa hogaaminta Maamulka Garsoorka, fadhigeeduna yahay xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, waxayna ka kooban tahay:

a) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare — Guddoomiyaha
b) Labada garsoore ee ku xiga dhinac darajada Guddoomiyaha — -Xubin
c) Xeer-ilaaliyaha Guud — -"
d) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda — -"
e) Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha — -"
f) Laba xubnood oo Golaha Wakiiladu labadii sannadood hal mar ka soo doorto dadweynaha kana kala tirsan aqoonyahanada iyo Ganacsatada.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

g) Laba xubnood oo Golaha Guurtidu labadii sanadoodba hal mar ka soo doorto dadaweynaha kana kala tirsan dhaqan-yaqaanada iyo Culimada Diinta.

2. Fadhiga Guddigu wuxuu ku ansaxayaa marka ay xubnihiisa ka joogaan (7) xubnood.
3. Marka uu Guddoomiyaha Maxkamadda Sare gudan kari waayo guddoominta fadhiyada guddiga sababo caafimaad, fasax ama shaqo ka tegid darted, waxa uu si ku-meel-gaadha Guddoomiyaha Guddiga noqonaya Garsoore ka tirsan maxkamadda sare ee Guddiga xubnta ka ah dhinaca darajadana ku xiga Guddoomiyaha Maxkamdda Sare ee Guddiga xubinta ka ah dhinaca darajadana ku xiga Guddoomiyaha Maxkamada Sare. Waxa Xoghayn u ah guddiga cadaaladda kaaliyaha Maxkamadda Sare.
4. Guddiga go'aamadeeda waxay ku gaadhaysaa Hal dheeri

## Qod.32aad.

## Hawsha Guddiga Caddaaladda.

Sida uu tilmaamayo qoddobka 108aad ee Dastuurka:

1. Wuxuu Guddiga Caddaaladda u xil saran yahay; Shaqo siinta, Dalacaadda, xil-ka qaadista, hoos u dhigidda, bedelaadda iyo anshax marinta Garsoorayaasha Maxkamadaha darajooyinka hoose, iyo ku xigeenadda xeer ilaaliyaasha guud.
2. Wuxuu ilaalinayaa xushmadda iyo dhawrsanaanta Garsoore ama Xeer-ilaaliye, oo aan la xidhi Karin, haddii aan ogolaansho laga helin Guddiga, hasa yeeshee looma baahna ogolaanshaha haddii garsooraha la qabto isagoo faraha kula jira dembi ciqaabtiisu ka yareyn (3) Sano oo xadhigga ah.
3. Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa Guddiga ka hor oogaya eedda ka xayuubinta dhawrsanaanta, anshax-marinta Garsoorayaasha iyo ku xigeenada xeer-ilaaliyayaasha, ka dib marka uu baadhista soo sameeyo.
4. Shirarka guddiga waxaa isugu yeedhaya guddoomiyaha, waxa kale oo isugu yeedhi karasaddex meelood oo laba hadday guddidu qoraal ku codsato, lagama maarmaana u aragto.
5. Guddigu waa inay fayl u furaan garsoore kasta iyo ku xigeennada xeer ilaaliyaha guud taasoo lagu kaydinayo dhammaan arrimaha khuseeya garsooraha iyo ku xigeenadda xeer ilaaliyaha guud, sida dallacaadaha, hoos u dhigidda, digniinta abaal marinta.
6. Guddigu waa inay samaysaa dabagal dhammaan arrimaha garsoorka.
7. Guddigu waa inay eegtaa baadhisna ku samaysaa ugu yaraan sanadkiiba hal mar, dacwadaha dhammaaday kuwa dhiman, kuwa lagu qancay, kuwa anbiilka laga qaata, kuwa lagu ayiday, kuwa lagu qancay iyo kuwa lagu jabiyey, si ay ugu suurtowdo qiimayntu.
8. Sida ku cad dastuurka qodobka 108 faqradda 3'aad xeer ilaaliyaha guud ayaa guddiga ka hor oogaya eedda ka xayuubinta dhawrsanaanta, anshax marinta, garsoorayaasha iyo ku xigeenadda xeer ilaaliyaha guud.
9. Waxa xeer ilaaliyaha ku waajib ah inuu dacwad ku soo oogo garsoore ama ku xigeen xeer ilaaliye guud marka guddiga cadaaladu sidaa go'aansato.
10. Xeer ilaaliyaha guud markuu oogayo anshax marinta cod ma leh.
11. Guddidu waxay oggolaadaan maamuus ka qaadista garsoore ama ku xigeen xeer ilaaliye guud haddii lagu soo ooggo danbiciqaabeed oo gudddidu garawsatay
12. Guddida caddaaladu waxay war bixin sanadeed qoraal ah, oo faahfaahsan u soo gudbiyaan labada Gole ee (Wakiiladda iyo Guurtida) iyo Golaha Xukuumadda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

## Qodobka 33'aad

## Baahinta Maxkamadaha.

1. Qof kasta oo ka mid ah Jsl, wuxuu xaq u leeyahay inuu halka ugu dhaw ka helo maxkamad uu ka furan karo dacwadiisa iyo cabashooyinkiisa
2. Degmo kasta oo ka mid ah Jsl, waxay xaq u leedahay in laga furo Maxkamd degmo.
3. Markay muuqato in goob looga baahan yahay in laga furo maxkamad, waxa soo jeedinaya Guddiga cadaaladda, waxaana diyaarinaya Xukuumadda,

## Qod. 34aad.

## Xidhiidhka Wasaaradda Cadaaladda Iyo Hay'adda Garsoorka.

1. Sida uu qeexayo qoddobka 106aad ee Dastuurka, Wasaaradda Cadaaladdu waxay u xil saaran tahay fulinta go'aanada maamul ee ka soo baxa Guddiga Cadaaladda.
2. Go'aanada maamul ee lagu xusay farqadda sare ku qoran ee Qoddobkan, waxa loola jeedaa go'aanada ay ka gadhaan hawlaha uu tilmaamayo qoddobka (108) ee Dastuurka.
3. Go'aanada Guddiga Cadaaladdu waxay dhaqan galayaan markay gudiggu gaadho saxeexana fulinta go'aamadda maamul ee guddigu gaadho wasaaradda cadaaladdana waa ku waajib

## Qod.35aad.

## Asbabta Anshax-marinta Garsoorayaasha/ku xigeenada X/Guud.

1. Ma bannaana in Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Xeer-ilaaliyaha Guud in lagu anshax-mariyo xeerkan.
2. Waxa loo gudbinayaa Guddiga Cadaaladda garsoore kasta oo ka mid ah garsoorayaasha maxkaadaha darajooyinka hoose iyo ku Xigeenada Xeer Ilaaliyaha Guud ee ku xad-gudba:
   a) Waajibaadka hawshiisa
   b) Sharaftiisa iyo xirfaddiisa fal xun oo hoos u dhigaya marka uu ku kaco
   c) Marka uu shaqada ka maqnaado muddo 30 maalmood ah fasax la'aan ama aan garawshiiyo lahayn.

## Qod. 36aad.

## Qaraar ka gaadhidda Dacwadda Anshaxa.

1. Guddigu markuu go'aansado in dacwadda anshax marin ah lagu soo ooggo garsoore ama ku xigeen xeer ilaaliye guud waxay amraysaa in guddiga ka hor ooggo xeer ilaaliyaha guud.

## Qod.37aad.

## Shaqo ka Joojin.

1. Way u bannaan tahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, ama ka maxkamad Racfaan ee uu ka tirsan yahay garsooraha ay khusayso dacwaddu ama Xeer Ilaaliyaha Guud, inuu si toos ah ama talo uu ka helay Guddiga Cadaaladda ka joojiyo shaqada garsooraha/ku Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee ay ku oogan tahay dacwadda anshaxu.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

2. Ka joojinta shaqada garsooraha/ku Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud saamayn kuma yeelanayso mushaharkiisa gebi ahaantiis ama qayb ka mid ah.

**Qod.38aad.**

**Habka Qaadista Dacwadda Anshaxa.**

1. Fadhiyada Guddiga Caddaaladu marka uu qaadayo dacwadda anshaxa waa mid sir ah
2. Waxa waajib ku ah Guddiga cadaaladda inuu fursad u siiyo garsooraha lagu qaadayo dacwadda anshaxa difaaciisa.
3. Wey u bannaan tahay garsooraha inuu u soo gudbiyo difaaciisa ama cid kale u soo wakiishoba.
4. Haddii uu Garsooruhu iman waayo, waxa u bannaan guddiga inuu ku wado dhegeysiga dacwadda isaga oo maqan, ka dib marka uu hubiyo in si waafaqsan sharciga loo gaadhsiiyey.

**Qod. 39aad.**

**Qaraarka Guddiga**

1. Waxaa waajib ah in ay ku caddahay qaraarka Guddiga cadaaladda asbaabtii uu u cuskaday go'aankiisa.
2. Fadhi qarsoodi ah ayuu Guddoomiyaha Guddigu ku akhriyayaa qaraarka guddiga.
3. Nuqul ka mid ah qaraarka waxaa la siinayaa garsooraha lagu qaaday dacwadda anshaxa
4. Sida ku cad qoddobka 106aad ee Distoorka, qaraarka ku sheegan Farqadda (1) ee qoddobkan, waxaa ku waajib ah Wasaaradda Cadaaladda in ay ku fuliso qaraarka Guddiga cadaaladda muddo Toddoba (7) maalmood gudahood ah. Haddii aan qaraarka cabasho laga qaadan.

**Qod. 40aad.**

**Ciqaab.**

Wey u bannaan tahay guddiga in uu garsoorayaasha/ku Xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud ku rido mid ka mid ah ciqaabaha soo socota:

a) Canaan (af ama qoraal)
b) In laga xaaraantimaynayo gunnada ama dalacaadda muddo aan gaadhayn 2 sano.
c) Shaqo ka saarid.

**Qod. 41aad.**

**Ka Cabasho Qaraarka Guddiga Anshaxa.**

Wey u bannaan tahay in cabasho (dib u eegid) laga soo qaato qaraarka guddiga (7) maalmood gudahood, taasoo ka bilaabmaysa marka la gaadhsiiyo ciddii xukunku ku dhacay.

**Qod. 42aad.**

**Ayidaad.**

Way u bannaan tahay Guddiga inuu si toosa ah, cabasho uga timid garsooraha/ku Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee ciqaabta anshaxu ku dhacdey uu baabiiyo ama wax ka bedelo ama uu ayido eedaynta



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

ama ciqaabta ama labadaba, qaraarkiisuna wuxuu noqonayaa mid kama danbeyn ah, iyadoo aanay bannaanayn in wax ka bedelka eedeynta ama ciqaabta ay Garsoore/Xeer-ilaahiye uga timaado dhibaato ka culus ta uu ka cabanayo.

### Qod. 43aad.

### Fulinta Ciqaabta.

Waxay ciqaabta shaqo ka saariddu noqonaysaa mid fulaysa oo Garsooruhu/ku Xigeenka Xeer-ilaaliyuhu ku waayayo awooddiisa Garsoorenimo/Xeer-ilaalineed laga bilaabo taariikhda ay Guddiga cadaaladdu saxeexdo qaraarkaasi.

## Qaybta shanaad

### Qod. 44aad

### Xeer ilaalinta guud

1. Xarunta Xeer ilaalinta guud waa magaalo madaxda, Gobol kastana waxa ka furnaan doona Xafiiska ku xigeenadda xeer ilaaliyaha guud.
2. Magacaabista Xeer ilaaliyaha guud waxaa soo jeedinaya Madaxweynaha, waxaana Cod hal dheeri ah ku oggolaanaya ama ku diiday Golaha wakiiladda, haddii Golaha wakiiladdu diidaan dib looguma soo celin karo.
3. Ku xigeenadda xeer ilaaliyaha guud waxa magacaaabaya Guddigga caddaalada kadib markay dhagaystaan soo jeedinta xeer ilaaliyaha guud.

### Qod. 45'aad

### Xilka iyo Waajibaaadka Xeer ilaalinta Guud.

1. Xafiiska xeer ilaaliyaha guud wuxuu dhawrayaa ilaalinayaana shuruucda dalka, xuquuqda madanigga ah ee agoonta iyo dadka tamarta daran ee aan lahayn awoodda ay iska difaacaan maxkamada horteeda.
2. Wuxuu oogayaa kana qayb galaa dacwadaha ciqaabta isagoo qaranka matalaya
3. Wuxuu amraa baadhista dacwadaha ciqaabta isagoo adeegsanaya Boliiska qaranka iyo laamihiisa baadhista.
4. Wuxuu danta caamka ah awgeed ka qaybgalaa dacwadaha madanigga ah ee ka qayb galkeedda sharcigu tilmaamayo, racfaana ka qaataa go'aamada ka soo baxa hadduu ku qanci waayo.
5. Wuxuu kormeeraa ilaaliyaana xaaladda nololeed, caafimaad, iyo nadaafadeed ee xabsiyada dalka, iyo meelaha kale ee dadka lagu xidho, isagoo hagaajinta wixii ka xun u gudbinaya meelaha ay khusayso, kuna dabagalaaya
6. Wuxuu oogaa dacwada ka dhanka ah golayaasha guurtida iyo Wakiilada kadib marka dhawrsanaanta laga xayuubiyo sida ku cad qod. 79 faqradda 2'aad ee Dastuurka jsl.
7. Wuxuu soo hordhigaa madaxweynaha eedaynta Wasiir ama Wasiir ku xigeen siduu dhigayo Qod. 96'aad faqradda 4'aad ee Dastuurka Jsl.
8. Xafiiska xeer ilaaliyaha guud wuxuu yeelanayaa kaaliye sare.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Qod. 46aad

### Dhawrsanaanta Xeer Ilaaliyaha Guud & ku xigeenadiisa.

1. Xeer ilaaliyaha guud iyo ku xigeenadiisa lama xidhi karo. lamina baadhi karo haddaan laga qaadin dhawrsanaanta ama aan lagu qaban iyaga oo faraha ku la jira danbi ciqaabtiisu qaadhayso ugu yaraan saddex sanno (3)
2. Xeer ilaaliyaha guud waxa dhawrsanaanta ka qaadi kara Madaxweynaha, ku xigeenadda xeer ilaaliyaha guud waxa dhawrsanaanta ka qaadi kara Guddigg Cadaaladda,

### Qod.47aad

### Dirayska bahda garsoorka.

Dirayska bahda garsoorka waxa xeer-nidaamiye ku soo saaraya Guddigga cadaaladda

### Qod.48'aad

### Garyaqaanka Guud ee Qaranka.

1. Waxa Madaxweynuhu magacaabayaa garyqaan guud
2. Qaryqaanka guud wuxuu ka furan karaa dacwad madani ah ama idaari ah maxkamdda awoodaha u leh isagoo dhawraya danta guud.
3. Wuxuu ka qayb galayaa dacwadaha madanigga ah, iyo idaarigga ee dawladdu dhinac ka tahay.
4. Wuxuu faafin rasmi ah ku soo saarayaa shuruucda dalka.
5. Wuxuu xogga sharcigga kala taliyaa xukuumadda iyo laamaheeda
6. Wuxuu diiwaan galinayaa, kaydiyaa hantidda ma guurtadda ah ee qaranka
7. Qaab dhismeedka xafiiska qaryaqaanka guud waxa nidaaminaya xeer gaar ah.

### Qod. 49aad

### Laalid & Dhaqangal

1. Wixii xeer ah ee ka soo horjeedda sharcigan ama aan la socon karin wuu burayaa
2. Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka madaxweynuhu saxeexo kadib ansixinta Golayaasha (Wakiiladda & Guurtidda)

**ALLAA MAHAD LEH**

Maxamed Xuseen Cismaan

Xoghayaha Guud Golaha Wakiilada

Axmed Maxamed Adan

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE